

Xaaladaha & Kahortaga Khatarta Tandhaafinta

Mukhaadaraadka obiyoodh waxaa kamid ah mukhaaraadka culus ee fentanyl iyo horowiin iyo sidoo kale dawooyinka ay qoraan dhakhaatiirtu ee xanuunnada lagu daweeyo sida morphine, codeine, methadone, oxycodone (Oxycontin, Percodan, Percocet), hydrocodone (Vicodin, Lortab, Norco), fentanyl (Duragesic, Fentora), hydromorphone (Dilaudid, Exalgo), iyo buprenorphine (Subutex, Suboxone). Kuwa soo socdaa waa xaaladaha khatarta qaar leeyahiin ee tandhaafka obiyoodhka iyo sidoo kale khidadaha kahortaga:

Iskudaridda Mukhaadaraadka

Tandhaaf badan waxa uu dhacaa marka ay dadku isku daraan harawiinka ama oobiyoohka la qoro iyo khamri iyo/ama benzodiazepines. Khamrida iyo benzodiazepines (Xanax, Klonopin, Ativan iyo Valium) ayaa si gaar ah u khatar ah maadaama, sida obiyoodhka oo kale ay waxyaabahani saameeyaan awoodda qofka ee neefsiga. Iska ilaali in obiyoodhka lagu daro mukhaadaraadka kale ama khamriga. Hadii uu dhakhtar kuu qoray obiyoodh iyo benzodiazepine, waxa aad u qaadataa sida laguugu qoray.

U adkaysiga

U adkaysigu waa awoodda uu jidhkaagu ku burburin karo mukhaadaraadka. U adkaysigu wuu is badalaa mudo kadib, markaa waxaad u baahan karaa mukhaadaraad dheeraad ah si aad u dareento daroogada. U adkaysigu waxa uu hoos u dhacaa marka uu qofku mudo uu joojiyo isticmaalka obiyoodhka. Marka uu qofku uusan lahayn u adkaysigii hore ee uu mar kale qaato obiyoodhka, waxa ay khatar ugu jiraan tandhaafid, xataa hadii uu qofku qaato xaddi aan markii hore waxba yeeli jirin. Hadii aad isticmaasho obiyoodh, mudo marka aad joojisay, waxa aad ka bilawdaa halka ugu hooseeya.

Caafimaadka Jidhka

Caafimaadka jidhkaagu waxa uu saameeyaa awoodda jidhkaagu uu ku maareynayo obiyoodhka. Maadaama uu obiyoodhku saameeyo awooddaada neefsiga, hadii aad qabto neef ama mushkilad kale oo neefsi ah waxa aad khatar ugu jirtaa tandhaafid. Shakhsiyaadka qaba xanuunnada beerka (jooniska), kalyaha, iyo dadka qaba HIV ayaa sidoo kale khatar badan ugu jira inay tandhaafaan.

Tandhaafka Hore

Qofka ay hore ugu dhacday tandhaafid aan nafta khatar ku ahayni waxuu ku sugan yahay khatar badan oo ah inuu tandhaafid nafta khatar ku ah yeelan doono mustaqbalka. Si aad uga hortagto tandhaafid khatar ah, waxa aad bartaa goyskaaga iyo asxaabta sida ay ku garanayaan oo ay uga jawaabayaan tandhaafid.

Sideen ku garanayaa hadii uu qof tandhaafay?

Hadii uu qof qaato oobiyoohd ka badan inta jidhkiisu qaadi karo, wuu suuxi karaa, waxa uu joojinayaa neefsiga oo wuu dhiman karaa. Tandhaafidda obiyoodhku waxay ku timaadaa daqiiqado ama saacado.

Qofka ay ku dhacdo tandhaafiddu waxa uu muujin karaa astaamaha soo socda:

- Neefsi yar (wax ka badan 1 neefsi 5 ilbidhiqsiba) ama aan neefsanaynin.
- Hunqaaco.
- Wajiga oo cadaada oo dhidida.
- Bishimaha, cidiyaha faraha ama suulasha oo buluug noqda.
- Garaaca wadnaha oo yaraada, aan caadi ahayn, ama aan garaacayninba.
- Cod khuuro ama dhawaaq inta uu qofku hurdo ama marka uu iska jiifo.
- Qofka oo marka lagu qayliyo magaciisa ama marka faraha looga xoqo xabadka aan jawaabaynin .

Tandhaafiddu waa XAALAD CAAFIMAAD OO DEGDEG AH!
Wac 9-1-1 isla markaba



STATE OF OHIO
BOARD OF PHARMACY

www.pharmacy.ohio.gov

Tilmaamaha Lagu Garto iyo Ka Jawaabida Tandhaafka



HAGAHA BUKAANSO-CODKA IYO DARYEELAYAASHA

Gudiga Gobolka Ohio ee Dawooyinka

Steven W. Schierholt
Maareeyaha Guud

Waa maxay naloxone?

Naloxone (Narcan) waxa weeye dawo dhakhtar qoro oo lagu dawayn karo tandhaafidda ay keento mukhaadaraadka oobiyoohku. Marka la isku mudo wakhtiga tandhaafidda, naloxone waxa ay xidhaa saamaynta oobiyoohka ee maskaxda oo waxay soo celisaa neefsiga. Waxay noqon kartaa irbad muruqa la iskaga mudo ama dawo sanku lagu buufiyo.

Naloxone looma yeelan karo balwad. Haddii la siiyo qof aan ku jirin tandhaafid oobiyooh ah, wa khatar ah ma lahan. Haddii naloxone la siiyo qofka ay ku dhacdo tandhaafid oobiyoohku, waxay keeni kartaa astaamaha xaraaradda. Naloxone meesha kama saarto tandhaafidda ay keenaan mukhadaraadka aan oobiyoohka ahayn.

MUHIIM:Naloxone waa in lagu kaydiyaa meel leh heerkulka caadiga ah ee qolka oo iftiinka ka fog. Naloxone way fadhiisataa marka meel heerkul hoose leh la dhigo. Haddii ay taasi dhacdo, dawadu uma tarayso wax sidii loogu talogaley.

Halka loo Doonanayo Kaalmo

Khadka Gudbinta Waaxda Ohio ee Caafimaadka Maskaxda iyo Daawaynta Adeegyada Balwadaha (8 subaxnimo - 6 galabnimo I-J)
1-877-275-6364

RecoveryOhio - Sida Loo Heleyo Kaalmo
www.pharmacy.ohio.gov/GetHelp

Adeegyada Balwadaha & Adeegyada Caafimaadka Helaha Bixiyaha Daaweynta
<https://findtreatment.gov/>

Sida looga jawaabayo tandhaafidda

1. Isku day inaad soo toosiso qofka adiga oo ku dhawaaqaya magiciisa oo laabta uga daliigaya farahaaga.
2. Wac 9-1-1. Waxa aad u sheegtaa in qofku aanu neefsanaynin ama ay neeftu ku adag tahay.
3. Waxa aad xaqiijisaa in qofka aysan afka wax neefta ku xiri kara aysan afka uga jirin. Haddii uu qofku joojiyay neefsiga ama uu si yar u neefsanayo, waxa aad bilawdaa neefta badbaadinta.

4. Afka Ugu Neefso

Talaabada 1: Madaxooda dib u janjeeri, gadhka kor u qaad, sanku qabo.

Talaabo 2: 1 mar si aayar ah ugu neefso 5 ilbidhiqsi oo kastaba. Waxa aad ku neefsataa sanbabkii oo waa in laabtu kor u kacdaa.

5. Isticmaal naloxone siina wad neefsiga hal mar 5 tii ilbidhiqsiiba.

6. Haddii uu qofku bilaabo neefsiga iskii, waxa aad u jiifisaa dhinac si aanu markaa ugu saxan hunqaacadiisa. Waxa aad la socotaa neefsigiisa oo ku neefso hadii neefsigiisu uu ka yar yahay 10 neefsi daqiiqaddii. Haddii uu hunqaaco, waxa aad ka masaxdaa afka iyo sanku.


7. Haddii aanu qofku kusoo toosin marka la toosiyo, codka ama taabashada, ama aanu bilaabin neefsiga caadiga ah, mar kale oo naloxone waa in la siiyaa.

8. Waxa aad la joogtaa qofka ilaa inta Gurmadka Degdegga ahi (EMS) ay imanayaan.

Sida loo bixiyo naloxone*:


Buufiska sanku (NARCAN™ Nasal Spray) - 4MG

1. Waxa aad dib u soo fiiqdaa meesha goobaabta leh si aad u furto buufinta sanku.
 2. Waxa aad ku haysaa aaladda suulkaaga xaga hoose ee cas, oo waxa aad fartaada kowaad iyo dhexe ku haysaa dhinaca afka buufiyaha. Ha tuujin ilaa inta aad diyaar u noqonayso inaad siiso.
 3. Waxa aad qofka u dhigtaa qadaadka gacantaadana jeegada hoosteeda uga soo taageer. Waxa aad aayar u gelisaa afka buufiska sanku ilaa inta labadaada farood ee labada dhinac ka haya afka buufiska ay taabtaan sanku hoostiisa.
 4. Waxa aad aayar u tuujisaa meesha cas si aad xadi dawada ah u siiso. Waxa aad ka saartaa aaladda sanku kadib marka aad siiso.
- Si aad u hesho nuqul tilmaamaha warshada booqo: www.pharmacy.ohio.gov/NARnasal



Buufinta sanku (Kloxxado™ Nasal Spray) - 8MG

1. Waxa aad bacda dib uga fiiqdaa meesha madow ee saddex xagalka leh si aad u furto buufiska sanku.
 2. Waxa aad dawada buufinta suulkaaga uga qabataa xaga hoose daboolka, fartaada kowaad iyo farta dhexena waxaad ku qabataa afka buufiska. Ha tuujin ilaa inta aad diyaar u noqonayso inaad siiso.
 3. Waxa aad qofka u dhigtaa qadaadka oo gacantaadajeegada hoosteeda uga soo taageer. Waxa aad aayar u gelisaa sankiisa hal dul ilaa inta labadaada farood oo dhinacyada ka haya afka buufiska ay taabtaan xaga hoose ee sanku qofka.
 4. Waxa aad aayar u tuujisaa meesha cas si aad xadi dawada ah u siiso. Waxa aad ka saartaa aaladda sanku kadib marka aad siiso.
- Si aad u hesho nuqul tilmaamaha warshadda booqo: www.pharmacy.ohio.gov/KLONasal



*Fadlan waxa aad ogaataa inay jiraan qaabab kale oo naloxone oo la heli karo. Sharciga Ohio waxa uu ku waajibiyay in bukaanka lagu toobaro qaabka naloxone loo isticmaalo. Farsamiyadu waa inay bixiyaan waraaqo toobabar ah oo dheeraad ah hadii qaabka loo qaadanayo naloxone aysan ku qornayn waraaqahan.